# Cusboonaysii

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Macluumaadka dadka shaqaynaya | 1 |
| Macluumaadka dadka hela Social Security (Amniga Sooshalka) dheefaha | 2 |
| Macluumaadka dadka hela Supplemental Security Income (Dakhliga Amniga Kaabida ah) (SSI, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah) | 3 |
| Macluumamadka dadka Medicare | 4 |


Cusboonaysiintan waxay bixisaa macluumaadka ku saabsan Social Security (Amniga Sooshalka) cashuuraha, dheefaha, iyo kharashyada 2024. Sharci ahaan, tirooyinka qaar si otomaatig ah ayay isku beddeshaa sanad kasta si loo sii wado isbeddelada qiimaha iyo heerarka mushaharka.

## Macluumaadka dadka shaqaynaya

### Social Security (Amniga Sooshalka) iyo Medicare cashuuraha

Social Security (Amniga Sooshalka) cashuuraha uu bixiyay shaqaalaha/loo shaqeeyaha (mid kasta):

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa 6.2% waxyaabaha la shaqaysto ilaa $160,200
- Sanadka 2024 waxa uu ahaa 6.2% waxyaabaha la shaqaysto ilaa $168,600

Social Security (Amniga Sooshalka) cashuurta uu bixiyay qofka iskii u shaqaysto:

- Sanadka 2023 waa 12.4%* waxyaabaha la shaqaysto ilaa $160,200
- Sanadka 2024 waa 12.4%* waxyaabaha la shaqaysto ilaa $168,600

Medicare cashuuraha uu bixiyay shaqaalaha/loo shaqeeyaha (mid kasta):

- Sanadka 2023 waa 1.45% dhamaman waxyaabaha la shaqaysto
- Sanadka 2024 waa 1.45% dhamaman waxyaabaha la shaqaysto

Medicare cashuur laga bixiyo qofka iskii u shaqaysta:

- Sanadka 2023 waa 2.9%* dhammaan waxyaabaha la shaqaysto
- Sanadka 2024 waa 2.9%* dhammaan waxyaabaha aad shaqaysay

**Waxay noqon kartaa hoos u dhac bixinta dakhliga cadhuurta*

### Buundooyinka shaqada

Marka aad shaqayso, waxaad shaqaysataa buundooyinka dhanka dheefaha Social Security (Amniga Sooshalka). Tirada buundooyinka aad u baahan tahay inaad u qalanto dheefaha Social Security (Amniga Sooshalka) ku xidhan da'daada iyo nooca dheefta aad codsanayso. Waxaad shaqaysan kartaa inta ugu badan 4 buundo sanad kasta. Badanka dadka waxay u baahan yihiin 40 buundo si ay ugu qalmaan dheefaha hawl gabka.

- Sanadka 2023 $1,640 waxa uu shaqaystay hal buundo
- Sanadkii 2024 $1,730 waxa uu shaqaystay hal buundo

## Macluumaadka dadka hela Social Security (Amniga Sooshalka) dheefaha

### Xadadka waxyaabaha la sahqaysto

Si waafaqsan sharciga federaalka, dadka helaya Social Security (Amniga Sooshalka) dheefaha oo aan gaadhin da'da hawl gabka, waxay xaq u leeyihiin inay helaan dhamaan dheefaha kale ilaa inta waxyaabaha ay shaqaystaan ay ka hooseeyaan xadadka hoos lagu sheegay. Dadka dhashay 1943 iyo 1954, da'da hawl gabka ee buuxaa waa 66. Da'da hawl gabka buuxa waxa uu u kordhaa si aayar ah sanad kasta ilaa uu gaadho da'da 67 dadka dhashay 1960 ama ka dib.

Haddii aad tahay da'da hawl gabka buuxa ama ka wayn tahay:

- Sanadka 2023 muu jirin xadka waxyaabaha la shaqaysto
- Sanadka 2024 muu jirin xadka waxyaabaha la shaqaysto

Haddii aad ka yar tahay da'da hawl gabka waxaanu kaa haynaa $1 dheefaha
$2 oo kasta oo ka badan xadka:

- Sanadka 2023 xadka inta la shaqaysto waxa uu ahaa $21,240
- Sanadka 2024 xadka inta la shaqaysto waa $22,320

Sanadka aad gaadhi doonto da'da hawl gabka buuxa waxaanu kaa haynaa $1 dheefaha $3 oo kasta oo ka badan xadka:

- Sanadka 2023 xadka inta la shaqaysto waxa uu ahaa $56,520
- Sanadka 2024 xadka inta la shaqaysto waa $59,520

***Xadadka waxyaabaha ay shaqaystaan ka faa'iidaystayaasha naafada ah:*** Haddii aad shaqayso marka aad hesho dheefaha naafanimada, waa inaad noo sheegtaa wax ku saabsan waxyaabaha la shaqaysto dhib ma leh sida ay u yar tahay waxa aad shaqaysato. Waxaa dhici karta inaad haysato wax aad shaqaysato oo aan xadidnayn muddada shaqada tijaabada ah ilaa 9 bilood (lama huraan maaha inay isku xigto) oo weli aad hesho dheefaha buuxa. Markaad dhammaysato muddadaada tijaabada ah ah ee 9 bilood, waxaanu go'aan ka gaadhi doonaa haddii aad xaq u leedahay dheefaha naafada. Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa taageerada shaqada ee kale si ay kaaga caawiso dib ugu soo wareegidaada shaqada.

Xadka waxyaabaha la shaqaysto ee Hawsha Faa'iidada leh ee dheefaha aan ahayn naafanimada indhoolaha:

- Sanadka 2023 waxyaabaha la shaqaysto waa $1,470 bishiiba
- Sanadka 2024 waxyaabaha la shaqaysto waa $1,550 bishiiba

Cusboonaysii

Xadka waxyaabaha la sahqaysto ee Hawsha Faa'iidada leh ee dheefaha naafanimada indhoolaha:

- Sanadka 2023 waxyaabaha la shaqaysto waa $2,460 bishiiba
- Sanadka 2024 waxyaabaha la shaqaysto waa $2,590 bishiiba

Xadka waxyaabaha la shaqaysto ee ka faa'iidaystayaasha naadada ka qayb galaya Muddada Tijaabada ee Shaqada:

- Sanadka 2023 waxyaabaha la shaqaysto waa $1,050 bishiiba
- Sanadka 2024 waxyaabaha la shaqaysto waa $1,110 bishiiba

## Macluumaadka dadka hela Supplemental Security Income (Dakhliga Amniga Kaabida ah) (SSI, xarfaha soo gaabsan oo Ingiriisi ah)

### Lacag bixinta bilaha ah SSI ee federaalka (inta ugu badan)

MInta ugu badan ee bilaha ah ee lacag bixinta SSI federaalka ee shakhsiga:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $914
- Sanadka 2024 waa uu ahaa $943

MInta ugu badan ee bilaha ah ee lacag bixinta SSI federaalka ee lamaanaha:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $1,371
- Sanadka 2024 waa uu ahaa $1,415

### Xadadka dakhliga bilaha ah

Xadka dakhliga bilaha ah ee shakhsiga dakhligiisa uu keliya ka yimid mushaharka:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $1,913
- Sanadka 2024 waxa uu ahaa $1,971

Xadka dakhliga bilaha ah ee shakhsiga dakhligiisa uu aan ka iman mushaharka:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $934
- Sanadka 2024 waa uu ahaa $963

Xadka dakhliga bilaha ah ee lamaanaha dakhligoodu uu keliya ka yimid mushaharka:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $2,827
- Sanadka 2024 waa uu ahaa $2,915

Xadka dakhliga bilaha ah ee lamaanaha dakhligoodu uu aanu ka iman mushaharka:

- Sanadka 2023 waxa uu ahaa $1,391
- Sanadka 2024 waxa uu ahaa $1,435

***FIIRO:*** *Haddii aad dakhli leedahay, dheeftaada bilaha ah guud ahaan waxay ka hoosayn doontaa inta ugu badan ee lacag bixinta SSI federaalka. Xusuuso, waa inaad nooga warbixisaa dhammaan dhakhligaaga anaga. Gobolada qaarkood waxay ku daraan lacagta ee lacag bixinta SSI federaalka. Haddii aad ku nooshahay mid ka mid ah goboladan, waxaad u qalmi kartaa lacag bixin ka badan. Dakhligaaga waxa uu ka badnaan karaa xadadka la sheegay oo weli waad u qalmi kartaa.*

Cusboonaysii

## Macluumamadka dadka Medicare

**Badanka Medicare kharashyadeedu way kordhayaan sanadkan si ay ula socdaan korodhka kharashyada daryeelka caafimaadka.**

### Caymiska Cusbitaalka (Qaybta A)

60 maalmood ee u horeeyay gudaha cusbitaalka bukaanku waxa uu bixiyaa:

- Sanadka 2023 $1,600
- Sanadka 2024 $1,632

Ilaa maalinta 61naad ilaa 90naad gudaha cusbitaalka bukaanku waxa uu bixiyaa:

- Sanadka 2023 $400 maalintii
- Sanadka 2024 $408 maalintii

In ka badan 90 maalmood gudaha cusbitaalka bukaanku waxa uu bixiyaa:

- Sanadka 2023 $800 maalintii
- Sanadka 2024 $816 maalintii

20 maalmood ee u horeeya gudaha xarunta kalkaaliska xirfada leh bukaanku waxa uu bixiyaa:

- Sanadka 2023 $0
- Sanadka 2024 $0

21ka ilaa maalinta 100laad gudaha xarunta kalkaaliska xirfada leh bukaanku waxa uu bixiyaa:

- Sanadka 2023 $200 maalintii
- Sanadka 2024 $204 maalintii

**Qaybta A Qadarka caymiska La iibsanayo:** Qadarka caymiska aad ku bixiso si aad u iibsato Medicare Qaybta A waxa uu ku xidhan yahay lambarka Social Security (Amniga Sooshalka) buundooyinka aad shaqaysatay. Haddii aad qabto:

- 40 buundo Qaybta A qadarka caymiska la iibsanayo 2023 waa $0
- 40 buundo Qaybta A qadarka caymiska la iibsanayo 2024 waa $0
- 30-39 buundo Qaybta A qadarka caymiska la iibsanayo 2023 waa $278 bishiiba
- 30-39 buundo Qaybta A qadarka caymiska la iibsanayo 2024 waa $278 bishiiba
- In ka yar 30 buundo Qaybta A qadarka caymiska la iibsanayo 2023 waa $506 bishiiba
- Wax ka yar qadar 30 Qaybta A qadarka caymiska la iibsado 2024 waa $505 bishii

### Caymiska Caafimaadka (Qaybta B)

Qaybta B Qadarka caymiska

- Gudaha 2023 waa $164.90 bishii**
- Sanadka 2024 waa $174.70 bishii**

Jarjarida

- Sanadka 2023 waa $226 sanadkii
- Sanadka 2024 waa $240 sanadkii

Ka dabid bukaanku waxa uu bixiyay jarjarida, Qaybta B waxay bixisaya 80% adeegyada la daboolo.

***FIIRO:*** *Haddii aad hesho Medicare oo dakhligaagu hooseeyo, gobolkaaga ayaa bixin kara kaaga Medicare qadarka caymiska iyo, xaaladaha qaarkood, jarjaridaada iyo kharashyada ka baxsan jeebka. La xidhiidh kaalmadaada caafimaadka maxaliga ah (Medicaid) wakaalada, adeegyada bulshadda ama xafiiska daryeelka macluumaadka dheeraadka ah.*

***Heeraka lacagta caymiska bilaha ah waa $174.70. Dadka qaarkood ee leh dakhli badan waxay bixiyaan lacag caymis oo badan.*

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10003-SO | January 2024 (Recycle prior editions)
Cusboonaysii
Update (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Uu soo saaray oo uu daabacay kharash cashuur bixiyaha Maraykanka